

# Tijaabo-qaadis wadareed oo ka dhacaysa dugsiyada hoose

Carruurta ayaa iskood tijaabo iska qaadi kara labo jeer toddobaadkii. Tijaabooyinka la iska qaadayo waa bilaash.

Ilmaha oo guriga jooga tijaabo ka qaad salaasada iyo jimcaha toddobaad kasta.

Tijaabada aad iska qaadayso waxa ku siinaya iskuulka. Ma u baahnid inaad iskuulka ka codsatid in lagu siiyo tijaabada.

Ilmaha ayaa tijaabada iska qaadaya, adiga oo caawinaya. Baakadda tijaabadu ku jirto waxa ku qoran habka tijaabada la isaga qaadayo.

Qofka koroonuhu ku dhacay 12-kii bilood ee u dambeeyay ma u baahna inuu tijaabo iska qaado.

## **Haddii tijaabada laga helo koroona?**

Waa in ilmuhu uu guriga joogo islamarkaana uu 2 mitir ka fogaado dadka kale.

Waa in ilmuhu uu tijaabo cusub iskaga soo qaado xarun tijaabo-qaadis. Waxaad

1. ballanta tijaabada ka samaysan kartaa internetka
2. adoo aan ballan samaysan aadi kartaa mid ka mid ah xarumaha tijaabo-qaadista degmadu leedahay ee Oslo ku yaalla
3. wici kartaa telefoonka koroonaha ee ah 21 80 21 82

## **Haddii tijaabada laga waayo koroona?**

Ilmuhu si caadi ah ayuu u aadi karaa iskuulka.

## **Waa ikhtiyaari in tijaabo la iska qaado**

Waa ikhtiyaari in tijaabada la iska qaado, adiga ayaana dooranaya in ilmahaaga tijaabo laga qaado iyo in kale.